

**Xeer-Sharci 19 Juunyo 1961, lamba. 3.**

**Jideyn (Goyn) fasax.**

## **MADAXWEYNAHA KMG EE JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qodobka 63, ee Dastuurka;

Markuu garwaaqsaday baahida iyo degdegga loo qabo in 20<sup>ka</sup> Juunyo 1961, taariikhda Aftida Dastuurka, lagu dhawaaqo in ay tahay maalin fasax ah xagga saameynta dhowritaanka (ilaalinta) saacada fasaxa oo idil iyo mamnuucnimada in la sameeyo qaar ka mida qoraallada (hawl) sharciga.

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

## **WUXUU XEERINAYAA (SOO SAARAYAA XEERKAN)**

### **Qod. 1**

Maalinta 20 Luulyo 1961, taariikhda Aftida Dastuurka, waxaa lagu dhawaaqayaa in tahay xagga dhammaan saameynta ku xusan qodobka 2aad, ee Xeerka – sharci, ee 30<sup>ka</sup> Agoosto 1960, lamba. 4, ayada oo la dhowraayo (ilaalinayo sharciga 10<sup>kii</sup> Disember 1960, eel lamba. 5.

### **Qod. 2**

Xeerkan Sharci, oo degdeg ayuu u dhaqangelaya, waxaa la hor-geynayaa (dhigayaa) Golaha

Xeerdejinya, sida uu qabo qodobka 63, ee Dastuurka, si loogu rogo (beddelo) sharci.

Muqdisho, 19 Juunyo 1961.

**Adan Cabdulle Cusmaan**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wasiirka Arrimaha Gudaha

**Cabdirisaaq Xaaji Xuseen**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw, lamba. 7 – Xaashi lamba. 92

Hantidhowraha: **Axmed Dahir Xasan**